Nidaamka Lacag-bixinta iyo Kharashyada (SOPAF) ee Qoysaska



Kheyraadkan wuxuu taageeraa qoysaska si ay si wacan u fahmaan SOPAF una sameeyaan go'aan rasmi ah.

Waa maxay SOPAF?

SOPAF waxay u taagan tahay System of Payments and Fees (Nidaamka Lacag-bixinta iyo Kharashyada). SOPAF wuxuu caawiyaa in la go'aamiyo inta ay qoyskaagu ka bixinayaan adeegyada Early Support for Infants and Toddlers (Taageerada Hore ee Dhallaanka iyo Carruurta Yaryar, ESIT). Adeegyada qaar, sida qiimaynta, had iyo jeer waa bilaash. Adeegyada kale, qoysaska ayaa laga yaabaa inay mas'uul ka noqdaan qayb ka mid ah lacag bixinta. Inta aad bixinayso waxay ku xiran tahay caymiska, tirada qoyska, dakhliga, iyo adeegyada uu ilmahaagu helo.

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad buuxiso foomamka SOPAF ee nooca caymiska aad haysato. Waxaa laga codsan doonaa inaad bixiso ogolaansho ah in bixiyahaagu uu ku dallaco caymiskaaga. Caymiska biilasha wuxuu ka caawiyaa bixiyahaaga inuu daboolo qaar ka mid ah kharashyada bixinta adeegyada. Haddii aad diido inaad hesho caymiskaaga, waxaa laga yaabaa inaad bixiso khidmad bille ah.

Noocyada caymiska

Caymiska dadweynaha

Haddii aad leedahay Apple Health, adeegyada mar walba waa bilaash, xitaa haddii aad diido oggolaanshaha gelitaanka. Haddii aad leedahay Child Health Insurance Program (Barnaamijka Caymiska Caafimaadka Carruurta, CHIP), waxaa laga yaabaa inaad bixiso lacag bille ah haddii aad diido inaad isticmaasho caymiskaaga. Lacagtaada billaha ah waxaa lagu go'aamin doonaa iyadoo lagu saleynayo tirada qoyskaaga iyo dakhliga guud ee guriga.

Caymiska gaarka ah

Haddii aad leedahay caymis gaar ah ama TRICARE, waxaad dooran kartaa inaad bixiso lacagaha wadaagista iyo lacagta kharashyada laga jaro ama inaad bixiso lacag bille ah (marna aan ka badnayn kharashka saxda ah ee adeegyada). Isuduwahaaga adeegga ayaa kaa caawin kara inaad go'aansato ikhtiyaarka ugu fiican. Haddii aad diido inaad isticmaasho caymiskaaga, waxaad bixin doontaa lacag bille ah oo lagu salaynayo tirada qoyskaaga iyo dakhliga gurigaaga.

Caymiska dadweynaha iyo kan gaarka ah

Haddii qoyskaagu leeyahay Apple Health iyo caymis gaar ah, ma bixin doontid wax lacag wadaag ah ama lacagta kharashka laga jaro ah.

Qoysaska aan lahayn caymis ama aan bixin faahfaahinta caymiska

Haddii qoyskaagu aanu lahayn caymis, ama haddii aadan bixin faahfaahinta caymiska, waxaa laguu soo dalacayaa lacag bille ah oo lagu salaynayo tirada qoyskaaga iyo dakhliga gurigaaga. Haddii aad diido inaad bixiso faahfaahinta dakhliga iyo kharashyada, waxaa lagugu xisaabin doonaa heerka ugu sarreeya ee lacagta lagu dalaco iyadoo lagu salaynayo tirada qoyskaaga.

Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

Awoodda Lacag Bixinta

Haddii qoyskaagu leeyahay caymis gaar ah ama TRICARE, waxaad dooran kartaa inaad hesho go'aan ku saabsan "Awoodda Lacag Bixinta". Dakhligaaga waxaa lala barbar dhigi doonaa Federal Poverty Limit (Xaddiga Faqriga ee Federaalka, FPL). Haddii dakhligaagu ka hooseeyo 200% ee FPL, adeegyada waa bilaash. Haddii dakhligaagu ka badan yahay 200%, waxaad dooran kartaa inaad bixiso lacagaha wadaaga iyo lacagta kharashyada laga jaro ama lacag bille ah. "Awoodda Lacag Bixinta" waa ikhtiyaari waxaana la codsan karaa waqti kasta.

Macluumaadka dakhliga iyo kharashka

Haddii qoyskaagu bixiyo lacagaha wadaaga iyo lacagta kharashyada laga jaro, faahfaahinta dakhliga iyo kharashyada looma baahna. Haddii qoyskaagu bixiyo lacag bille ah, ama marka la go'aaminayo "Awoodda Lacag Bixinta" ama la codsaday xaalad adag, faahfaahinta dakhliga iyo kharashyada waa loo baahan yahay.

Ka dhaafida lacageed xilliga xaalada adag

Haddii qoyskaagu awoodi waayo inuu bixiyo lacagaha wadaaga, lacagta kharashyada laga jaro, ama lacag bille ah, waxaad codsan kartaa ka dhaafida lacageed xilliga xaalad adag. Isku-duwaha adeeggaaga ayaa kaa caawin doona inaad dhammaystirto codsiga ka dhaafida, bixiyahaaga adeegga ayaana dib u eegi doona codsigaaga. Haddii ka dhaafida la ansixiyo, qoyskaagu wuxuu ku heli doonaa adeegyada si bilaash ah. Haddii ka dhaafida la diido, adiga ayaa mas'uul ka noqon doona lacagaha wadaaga, lacagta kharashyada laga jaro, ama lacagaha bille ah. Ka dhaafida waxaa la codsan karaa waqti kasta waxayna u baahan tahay go'aan ku saabsan "Awoodda Lacag Bixinta".

Immisa jeer ayaa foomamka la buuxiya

Dhammaan qoysasku waxay sannad kasta iyo ka hor inta aan adeegyada la bilaabin buuxin doonaan foomamka SOPAF. Qoysaska leh caymis gaar ah ama TRICARE, foomamka waxaa la cusbooneysiin doonaa markasta oo ay jirto isbeddel saameynaya lacagta qoyskaagu bixiyo.

Lacagaha Khiyaannada

Waa muhiim inaad bixiso lacagahaaga. Haddii qoyskaagu awoodi waayo, fadlan la xiriir isku-duwaha adeeggaaga si loo dhammaystiro go'aanka "Awoodda Lacag Bixinta" iyo, haddii loo baahdo, ka dhaafida lacageed xilliga xaalad adag. Haddii lacag bixintu ay ka dib dhacdo 90 maalmood, adeegyada waa la joojin karaa. Haraagaaga baaqiga ah waxaa loo diri karaa hay'ad ururinta deynta.

Wixii macluumaad dheeraad ah

Siyaasadda SOPAF, foomamka, iyo jadwalka lacagaha waxaa laga codsan karaa isku-duwahaaga adeegga. Waxay sidoo kale ka heli kartaa bogga internetka ee ESIT **https://dcyf.wa.gov/services/child-dev-support-providers/esit/forms-publications** qaybta "Nidaamka Lacag-bixinta iyo Xeerka Kharashyada iyo Dukumentiyada La Xiriira."